

Magaalada Seattle

# Sharciga Xuquuqaha Macmiilka

**Marka shaqo lala sameynayo Magaalada Seattle, macamiishu waxay xaq u leeyihiin in ay helaan adeegyo oo dhakhso ah, hawl qabad fiican leh oo si fudud loo heli karo – laga bilaabo biyaha iyo quwadda illaa waddooyinka iyo nabadgelyada dadweynaha. Macmiisha la xiriira xafiis ama shaqaale ka mid ah Magaalada Seattle waxay filii karaan hawl qabasho aad u-fiican. Sharciga Xuquuqaha Macmiilka waxa hoggaamiya afar heer.**

**1. Sahlan oo la fahmi karo -- Shayada iyo adeegyada Magaaladu bixiso waa in si sahlan loo heli karo oo loona isticmaali karo.**

- Magaaladu waa in ay gaartaa macmiisheeda si ay macluumaad ka siiso shayada iyo adeegyada ay Magaaladu bixiso.
- Macmiilku waa in uu gaari karaa adeeg kasta ee Magaaladu bixiso oo codsi ku bilaabi karaa hal taleefoon, booqasho [seattle.gov](http://seattle.gov), aado xarunta adeegga, ama qoro warqad.
- Marka codsiga macmiilku yahay mid ku lug-leh dhawr xafiisyo ama waaxyo ee Magaalada ah, Magaaladu wey isu-duwi doontaa shaqada.
- Macmiilku waa in uu helaa macluumaad cad oo sax ah.
- Macmiilku waa in loola dhaqmaa si leh edeb akhyaarnimo iyo ixtiraam.

**2. Jawaabi og -- Shaqaalaha Magaaladu waa inay caawimaad diyaar u yihiin, oo macmiillada ku xiraan kuwii kale ee caawini kara haddii aynan iyagu caawin karin.**

- Magaaladu waa iney adeegyada bixisa saacado iyo meelo macmiillada u dhib-yar.
- Magaaladu waa iney bixisaa qiyaas inta ay qaadnayso, iyo haddii lagu dabakhi karo, kharajka ku bixi kara fulinta codsiga macmiilka.
- Magaaladu waa iney la socodsiiisaa macmiilka labadoodba oo ah horumarka iyo dhakhso uga jawaabidda su'aalaha ku saabsan xaalka cudsiyada laalan.

**3. Xaq-ah -- Waa in aynan jirin waxyaabo ku gudban oo ah dhaqaale, bulsho ama dhaqan isticmaalidda shayada iyo adeegyada ay Magaaladu bixiso.**

- Magaaladu waa iney wada-shaqayn la yeelato macmiisheeda si loo hubiyo in qorsheynta iyo maamulidda adeegyada Magaalada ay fulinayso baahiyada macmiilka.
- Magaaladu waa in ay bixisaa adeegyada turjumaadda marka ay daruuri tahay si loo fuliyo codsiga macmiilka.

**4. Natijjooyin u Hanuunsan -- Macmiilladu waa inay helaan natijjooyin, aan ahayn hannaanka hawl socodka oo keliya.**

- Magaaladu waa iney, waqti sugan, dabagal la-samaysa macmiilka ka-dib marka codsigu dhammaado.
- Magaaladu waa iney qiimayn si joogto ah u sameyso oo warbixinna ka bixiso gebi ahaan hawl-fulinta marka lala xiriirayo ama la xallinayo codsiyada macmiisha.

Wixii warbixin dheeraad ah, la xiriir Xafiiska Adeegga Macmiilka (Customer Service Bureau) ee [www.seattle.gov/CustomerService](http://www.seattle.gov/CustomerService) ama waac (206)684-CITY (2489)